



Farriintani waxaa iyada oo ah Ingiriisi, Af-Ruushka, Simplified Chinese, Soomaali, Isbaanish iyo Vietnamese la soo geliyay:

<https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Sibtambar 7, 2021-ka

Ku socoto: Shaqaalaha ODDS iyo Hawl wadaagayaasha

Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka (ODDS) iyo Acacia McGuire Anderson, Isku duwaha Employment First ee Gobolka

Ujeedada: Kulanka Dhanka Internet-ka ee Bisha Wacyi gelinta Shaqaaleysiinta Naafada ee Qaranka

Kulamada dhanka internet-ka oo ah taxane toddobaadle ah ee Qado & Waxbarasho lacag la'aan ah ayaa la qaban doonaa bisha Oktoobar si loogu dabaaldego Bisha Wacyi gelinta Shaqaaleysiinta Naafada ee Qaran (NDEAM).

Hal hayska loogu talagalay NDEAM 2021, "America's Recovery: Wuxuu ku shaqeynayaa Ka mid noqosho," oo ka turjumaysa muhiimada ay leedahay xaqiijinta in dadka naafada ah yeeshaan helitaan buuxa oo la xiriira shaqada iyo ka qayb galka bulshada inta lagu jiro ka soo kabashada qaranka ee cudurka baahsan ee COVID-19.

Dadka naafada ah ee uu saameynta aan sinayn ku yeeshay cudurka baahsan ee COVID-19 ee lumiyay shaqadooda kaasi oo gaarsiisan heer ka sarreeya dadka ay isku faca yihiin ee aan lahayn naafanimada. Dadka reer Oregon ee naafada ah, shaqo-bixiyayaasha iyo khabarada ayaa dadka la wadaagi doona sheekooyinkooda iyo ilaha loogu talagalay shaqaaleysiin guul leh.

Waxaa martigeliyay Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon, Tababarka Dhaqancelinta, Guddiga Oregon u qaabilsan Indho la'aanta iyo Waaxda Waxbarashada ee Oregon, kulamadan dhanka internet-ka ee toddobaadlaha ah waxaa loo qaban doonaa internet-ka ahaan laga

bilaaboduhurka 1 galabnimo Talaado kasta bisha Oktoobar, laga bilaabo Oktoobar 5.

Faahfaahinta soo socotaa waxay ku saabsan tahay sida loogu soo birayo taxanaha kulanka dhanka internet-ka:

- Wixii kulamo ah hore iskaga sii diiwaangeli:
<https://www.zoomgov.com/j/1602762553?pwd=VnZFSGEwSkc5c0Q3WTlxaTAXQ0FEUT09>

Is diiwaangelinta ka dib, waxaad heli doontaa email xaqiijin ah oo ka kooban macluumaadka ku soo biirista kulanka.

Aqoonsiga Kulanka: 160 276 2553; Passcode-ka: 469718; Lambarka telefoonka la taabanayo 'One tap mobile'

+16692545252,,1602762553#,,,,*469718# US (San Jose)

+16468287666,,1602762553#,,,,*469718# US (New York)

Meesha laga sii gelayo hadalka qoraalka ah 'captioning'

<https://www.streamtext.net/player?event=DHSOHA>

Maadooyinka taxanaha ah iyo jadwalka:

Talaado, Oktoobar 5

Hal-abuurka Shaqada waqtiga lagu jiro COVID-19

Talaado, Oktoobar 12

Socdaalka Shaqo ee Dhallinyarada

Talaado, Oktoobar 19:

Kordhinta Saacadaha: Sida loo Hago Adeegyada

Talaado, Oktoobar 26

Soo kabashada Xooga Shaqaalaha: Wuxuu ku shaqeynayaa Ka mid noqosho (guddi leh hoggaamiyayaal ganacsi)

Kulamadaasi waxaa heli kara dadka naafada ah. Muuqaal Qoraal la Socdo 'Captioning' iyo Turjubaanada Luqadda Dadka aan wax Maqli karin ayaa la bixin doonaa. Su'aalaha ku saabsan helitaanka, ama codsiga in wax la sii qorsheeyo oo ay ku jirto turjumaada luqadaha, fadlan la xiriir

DD.DirectorsOffice@dhsosha.state.or.us

Codsiyada waa in la sameeyaa ugu yaraan 48 saacadood ka hor kulamada.

Waxa farriintani ku lifaaqan waa warqad xayaysiis ah 'flyer' oo loogu talagalay dhacdada iyo kaarka warbaahinta bulshada oo la iskula wadaagi karo kanaaladaada. Si ballaaran wax ula wadaag!

Waad mahadsan tahay shaqadaada iyo taageerida dadka reer Oregon ee qaba naafanimada maskaxda ama korriinka.

Si Daacadnimo leh,

Lilia iyo Acacia

Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada gudbinta oo dhan ama waxaad wici kartaa 711.